# OGEYSIISKA HAB-DHAQANNADA

**OGEYSIISKAN AYAA WUXUU SHARXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SII DEYN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB-U-EEGIS UGU SAMEE.**

## Waxaa Sharci Ahaan Nalooga Baahan Yahay:

- In aan xaqiijinno macluumaadka caafimaad ee adiga lagugu aqoonsanayo in laga dhigo mid gaar ah oo qarsoon ama sir ah.
- In aannu ku siinno ogeysiiskan waajibaadyadeenna sharci iyo hab-dhaqannada asturnaanta ee marka la eego macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan.
- In aannu raacno Ogeysiiskeenna Hab-dhaqannada Asturnaanta ee hadda.
- In aynu kaala hadalno isbeddelo kasta ee ogeysiiska ku jira.

## Kumaa Raaci Doonna Ogeysiiskan:

- Dhammaan waaxaha iyo qaybaha hab-dhaqankan xafiiska.
- Dhammaan shaqaalaha iyo hawlwadeennada kale ee xafiiska.
- Dhammaan hay'adaha kale, meelaha iyo goobaha xirfadlayaasha daryeelka caafimaad ee xafiiskan ay kaga dhaqmaan kuna raacaan shuruudaha ogeysiiskan. Waxaa intaa dheer, hay'adahan, goobahan iyo meelahan in ay u wadaagi karaan macluumaad caafimaadka ujeeddooyin daaweyn, lacag-bixin ama hawlgallo sida lagu qeexay ogeysiiskan.
- Mutadawac ama iskii-u-shaqeyste kasta ee aan u oggolaanno in uu ku caawiyo inta aad ku jirto xafiiska.
- Arday caafimaad kasta, tababarte, dhakhtarka ku Jira waxbarashada (fellow) ama dhakhtarka dhammeystay waxbarashadiisa (Resident) ee aan u oggolaanno in uu ku caawiyo inta aad ku jirto xafiiska.
- Wakiil kasta ee ka socda shirkadda caymiska, hay'adda daryeelka la maareeyo, hay'adda cilmi-baarista caafimaadka, hay'adda falanqeynta xogta, ama hay'adda sii wanaajinta tayada ee ka qaybgalaysa dib-u-eegista daryeelkaaga caafimaad.

## Adeegsiyada iyo Shaacinta ee loogu talagalay Daaweynta, Lacag-bixinta iyo Hawlgallada:

- ***Daaweynta:*** Waxaannu adeegsan karnaa macluumaadkaaga si aynu u bixinno, isu-duwno, oo aan u maareyno daryeelkaaga iyo daaweyntaada. Tusaale ahaan, bixiyaha MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa la hawlgalla ama gacansaarka la leh waxay ula wadaagi karaan macluumaadkaaga dhawrsan dhakhtar kale ujeeddooyin wadatashi. Waxaannu heli doonnaa oggolaanshahaaga qoran ka hor inta aan la sameyn shaacinta ka baxsan MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa la hawlgalla iyada oo ujeeddooyinku yihiin daaweyn, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah marka aysan suuragal ahayn in oggolaanshahaaga la helo.
- ***Lacag-bixinta:*** Waxaannu adeegsan karnaa oo aan shaacin karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan si daaweynta iyo adeegyada aad hesho qaansheegooda loo soo gudbiyo, oo lacag-bixintanna waxaa laga yaabaa in laga qaado, adiga, shirkad caymis, ama cid kale oo saddexaad. Tusaale ahaan, waxaan u baahan karnaa in aannu bixinno macluumaadka qorshaha caafimaad ee ku saabsan daaweynta aad ka heshay MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa la hawlgalla si qorshahaaga caafimaadka uu inoo siiyo lacagta ama lacag-celin kuugu sameeyo daaweynta. Waxaa sidoo kale laga yaabaa in aan u sheegno qorshahaaga caafimaadka daaweynta aad heli doontid si aad u hesho oggolaansho hore ama si aad u go'aamiso haddii qorshahaaga uu haqabtiri doonno daaweynta. Waxaannu heli doonnaa oggolaansho qoran ka hor inta aan shaacinta loo sameyn ujeeddooyin lacag-bixin.
- ***Hawlgallada Daryeel Caafimaad:*** Waxaannu adeegsan karnaa oo aan shaacin karnaa macluumaad caafimaad oo adiga kugu saabsan oo loogu talagalay MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah hawlgallada daryeelka caafimaadka ee iyagga gacansaarka la leh. Hawlgallada daryeel caafimaad waa adeegsiyada iyo shaacinta macluumaadka lagama maarmaanka u ah hawlgalka MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh iyo si loo xaqiijiyo in bukaanadeenna oo dhami in ay helaan daryeel tayo leh. Tusaale ahaan, waxaannu adeegsan karnaa macluumaad caafimaad si aynu dib-u-eegis ugu sameyno daaweynta iyo adeegyadeenna, iyo in la qiimeeyo waxqabadka shaqaalaheenna iyo dhakhaatiirteenna ee daryeelidaada. Waxaannu heli doonaa oggolaansho qoran ka hor inta aan

la sameyn shaacinta kuwa kale ee ka baxsan MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh ee loogu talagalay ujeedooyinka hawlgallada daryeel caafimaad.

## Waxaannu u Adeegsan Karnaa oo aan u Shaacin Karnaa Macluumaadka Caafimaad:

- ***Xusuusinnada Ballanta iyo Macluumaadka Kale ee Caafimaadka:*** Waxaannu adeegsan karnaa macluumaadkaaga caafimaad si aynu kuugu soo dirno xusuusinno ku saabsan ballamaha mustaqbalka. Waxaan sidoo kale kaagala soo xiriiri karnaa macluumaadka ku saabsan daaweynta cusub ama beddelka ah ama adeegyada kale ee daryeelka.
- ***Si Looga Hortaggo Halis Dhab ah oo ku soo wajahan Caafimaadka ama Bedqabka:*** Waxaannu adeegsan karnaa ama shaacin karnaa macluumaadka caafimaad oo adiga kugu saabsan marka loo baahdo si looga hortaggo halista dhabta ah ee ku soo wajahan caafimaadkaaga iyo bedqabkaaga ama caafimaadka iyo bedqabka dadweynaha ama qof kale. Shaacin kasta waa in loo sheegaa oo keliya qof awoodda in uu gacan ka geysto ka hortagga halista. Waxaa intaa dheer, in sharciga Minnesota uusan guud ahaan oggolaan shaacintan haddii aannu haysano oggolaanshahaaga qoran oo aan sidaa ku sameyno mooyaane ama marka shaacinta aniga gaar ahaan uu igaaga baahan yahay sharciga, oo ay ku jiraan xaalado xaddidan oo xirfadlayaasha daryeelka caafimaad MNGI Digestive Health, P.A. iyo kuwa gacansaarka la leh uu "waajibaad ka saaran yahay in ay digniin bixiyaan."
- ***Dadka Kaa Caawinaya Daryeelkaaga:*** MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh ayaa keliya macluumaadka caafimaad u sheegi doonna kuwa ku daryeelaya, kaa caawinaya bixinta qaansheegyadaada, ama xubnaha kale ee qoyska dhow ama saaxiibada haddii dadkan ay u baahan yihiin in ay macluumaadkan oggaadaan si laguu caawiyo, iyo keliya xadka ilaa iyo intuu sharcigu oggol yahay. Waxaa, tusaale ahaan, bixin karnaa macluumaad caafimaad oo xaddidan si aan ugu oggolaanno xubinka qoyska in uu kuu soo qaado daawooyinka la isu qoro. Guud ahaan, waxaannu heli doonnaa oggolaanshahaaga qoran ka hor inta aan qoyskaaga ama saaxiibadaada loo sheegin waxa adiga kugu saabsan. Haddii aadan awoodin in aad qaadato go'aamo daryeelka caafimaad oo adiga kuu gaar ah, MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh ayaa ku weyddiin doonna fasax ka hor inta aadan u adeegsan macluumaadka caafimaad ujeeddooyinkan. Haddii aadan awoodin in aad gaarto go'aamada daryeel caafimaad, MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacasaarka la leh ayaa waxay macluumaadka caafimaadka ku habboon u sheegi doonnaan xubnaha qoyska ama dadka kale ee mas'uulka ah haddii aynu dareenno in ay ku jirto dantaada ugu wanaagsan in sidaa la sameeyo, oo ay ku jirto xaaladda degdegga ah.
- ***Sida uu Sharcigu Qabo:*** Waxaannu sheegi doonnaa ama shaacin doonnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan marka uu sidaasi nooga baahan yahay in aynu sameyno shaciga federaalka, gobolka ama kan maxalliga ah.
- ***Cilmi-baaris:*** Sharciga Federaalka ayaa wuxuu u oggol yahay MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh in ay u adeegsadaan oo ay u sheegaan macluumaadka adiga kugu saabsan ujeeddooyin cilmi-baaris, midkood marka la haysto oggolaanshahaaga qoran, gaar ah ama marka daraasadda dib-u-eegis ugu sameeyo ilaalinta asturnaanta Guddiga Dib-u-eegista Hay'adda ama Guddiga Asturnaanta ka hor inta aysan cilmi-baaristu bilaaban. Xaaladaha qaar, cilmi-baarayaasha ayaa loo oggolaan karaa in macluumaadka ay u adeegsadaan hab xaddidan si loo go'aamiyo haddii daraasadda ama ka-qaybgalayaasha suuragalka ah ay yihiin kuwo habboon. Sharciga Minnesota ayaa guud ahaan u baahan in aynu helno oggolaanshahaaga guud ka hor inta aanan u sheegin ama u shaacin macluumaadka caafimaadkaada cilmi-baare dibedda ka socda. Waxaannu sameyn doonnaa dadaal daacadnimo ku dheehan si aan u helno oggolaanshaaga ama diidmadaada ka-qaybgalka daraasad cilmi-baaris kasta, sida uu sharciga qabo, ka hor inta aan loo sii deyn cilmibaare dibedda ka socda macluumaad kasta oo lagugu aqoonsan karo.
- ***Saaxiibada Ganacsiga:*** Adeegyada qaar waxaa bixiya ama waxaa la siiyaa MNGI Digestive Health, P.A. ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh iyada oo loo marayo qandaraas lala galayo saaxiibada ganacsiga. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah MNGI Digestive Health, P.A.'s ama mid ka mid ah qareennada gacansaarka la leh, hay'adaha ururinta, iyo ururrada aqoonsiga bixiya. Waxaan macluumaadka adiga kugu saabsan u sheegi karnaa ganacsiyada saaxiibadeenna ah sidaa daraadeed waxay qaban karaan shaqada aan qandaraaska kula galnay in ay noo qabtaan. Si loo ilaaliyo macluumaadka la shaaciyay, ganacsi kasta oo xiriir nala leh waxaa laga doonayaa in uu saxiixo heshiis uu si habboon ugu ilaalinayo macluumaadka iyo in aanan shaacin macluumaadka haddii uu si gaar ah sharcigu u oggolaado mooyaane.
- ***Militeriga iyo Ciidanka Hawlgabka ah:*** Haddii aad xubin ka tahay ciidamada qalabka sida, waxaannu u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan haddii ay u baahan yihiin mas'uuliyiinta taliska militeriga haddii uu sharcigu nooga baahan yahay in aynu sidaa sameyno, ama marka aynu haysano oggolaanshahaaga oo qoran. Waxaan sidoo kale u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaad ee ku saabsan hawlwadeennada militeriga shisheeyaha ah maamulka militeriga shisheeyaha ah ee ku habboon oo ah sida uu sharcigu qabo, ama oggolaansho qoran.
- ***Isugu Deeqidda Xubnaha iyo Nudayaasha Jirka:*** Haddii aad tahay qof xubin ku deeqaya qof kale, waxaa laga yaabaa in macluumaadka caafimaad u sii deyno hay'adaha ka shaqeeya iibka xubnaha ama

ku tallaalidda xubnaha, indhaha ama nudaha ama banki dadka ku deeqa xubinka, sidii loogu baahdo si loo fududeeyo ku deeqidda iyo ku tallaalidda xubinka ama nudaha.

- *Caafimaadka Dadweynaha:* Waxaan u shaacin karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan hawlaha caafimaadka dadweynaha. Hawlahan guud ahaan waxaa ka mid ah kuwan soo socda:
  - Si looga hortaggo ama loo xakameeyo cudurka, dhaawaca ama naafonimada
  - Si looga warbixiyo dhalashooyinka iyo dhimashada
  - Si looga warbixiyo xad-gudubka ama dayaca carruurta
  - Si loo soo sheego fal-celinnada daawooyinka ama dhibaatooyinka badeecooyinka
  - Si dadka loo xusuusiyo badeecooyinka laga yaabo in ay adeegsanayaan
  - Si loo ogeysiiyo qof cudurka qaday ama laga yaabo in uu halis ugu jiro qaadista ama faafinta cudur ama xaalad
  - Si loogu wargeliyo maamulka dowladeed ee ku habboon haddii aynu aaminsanahay in bukaanku uu ahaa dhibbanaha xad-gudub, dayac ama tacaddiga qoyska gudahiisa ah. Waxaannu keliya sameyn doonnaa shaacintan haddii aad oggoshahay ama marka uu sharcigu u baahan yahay ama oggol yahay

- *Magdhowga Shaqaalaha:* Waxaannu u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan barnaamijyada magdhowga shaqaalaha ama kuwa la midka ah. Barnaamijyadan waxay bixiyaan dheefaha loogu talagalay jirooyinka ama dhaawacyada shaqada la xiriira.

- *Hawlaha La-socodka Caafimaadka:* Waxaannu u sheegi karnaa macluumaadka caafimaadka hay'adda la-socodka caafimaadka ee loogu talagalay hawlaha sharcigu oggol yahay. Hawlahan la-socodka waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, hanti-dhowrka, baaritaannada, kormeerka, iyo shati-bixinta. Hawlahan waa lagama maarmaan si dowladdu ay ula socoto nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada dowladda, iyo u hoggaansamidda sharciyada xuquuqaha madaniga ah.

- *Dacwadaha iyo Khilaafaadka:* Haddii aad ku lug leedahay dacwad ama khilaad, waxaa laga yaabaa in aynu shaacino macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan annaga oo ka jawaabayna amar maxkamadeed ama mid maamul. Sidoo kale waxaan shaacin karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan annaga oo ka jawaabayna maxkamad u yeerid, codsiga helidda, ama hannaanka kale ee sharciga ah ee qof kale oo ku lug leh khilaafka, balse sidoo kale haddii dadaalo la sameeyo si laguugu sheego codsiga ama si loo helo amar lagu ilaalinayo macluumaadka la codsaday.

- *Hawlaha Sirdoonka iyo Amniga Qaranka:* Waxaan sidoo kale u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan saraakiisha dowladda federaalka ee loo oggol yahay si ay ugu adeegsadaan hawlaha sirdoonka, ka hortagga sirdoonka, iyo hawlaha kale amaanka qaranka ee uu sharcigu oggol yahay.

- *Sharci Fulin:* Waxaannu sii deyn karnaa macluumaad caafimaad haddii uu sidaa in aan sameyno naga codsado maamulka sharci fulinta:
  - Iyada oo laga jawaabayo amar maxkamadeed, wicid maxkamadeed, waaranka, amar maxkamadda lagu hor imaanayo ama hannaan la mid ah
  - Si loo aqoonsado ama meel loogu sheego qof tuhumane, baxsad, markhaati ah, ama qof la la'ayahay
  - Ku saabsan dhibbanaha dembiga haddii, sida ku cad xaaladaha qaar ee xaddidan, aan awoodi wayno in aynu helno heshiiska qofka
  - Ku saabsan dhimasho aan aaminsanahay in ay sabab u tahay hab-dhaqan dembi
  - Ku saabsan hab-dhaqanka dembi ee xafiiska ama xarunta qalliinka la xiriira socodka
  - Xaaladaha degdegga ah ee looga warbixinayo dembiga; goobta dembiga ama dhibbanayaasha; ama aqoonsiga, sharraxaadda ama goobta uu joogo qofka geystay fal-dembiyeedka

- *Baarayaasha Sababta Dhimashada, Baarayaasha Caafimaad iyo Agaasimayaasha Aaska:* Waxaannu macluumaadka caafimaadka u sii deyn karnaa baaraha sababta dhimashada ama baare caafimaad. Tani ayaa lagama maarmaan noqon karta, tusaale ahaan, si loo aqoonsado qof dhintay ama si loo go'aamiyo sababta dhimashada. Waxaan sidoo kale haddii loo baahdo u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaad ee ku saabsan bukaannada agaasimayaasha aaska si ay u gutaan waajibaadkooda.

- *Adeegyada Ilaalinta ee loogu talagalay Madaxweynaha iyo Kuwa Kale:* Waxaan u sheegi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan saraakiisha federaalka ee idman si ay u ilaaliyaan Madaxweynaha, shakhsiyaadka kale ee idman ama madaxda dowlado shisheeye, ama si ay u sameeyaan baaritaanno gaar ah. Waxaannu adeegsan karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan si aan u qaadanno go'aamo ku saabsan in aad caafimaad ahaan ku habboon tahay hubsashada qof in lagu aamin qabi karo ama adeeg dibedda ah. Waxaan sidoo kale u siideyn karnaa go'aaminta caafimaad ahaan in aad habboon tahay saraakiisha Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee u baahan in ay macluumaadkaas ujeeddadan awgeed u helaan.

- *Maxaabiista:* Haddii aad tahay maxbuus ku jira gacanta hay'adda asluubta ama uu gacanta kugu hayo sarkaal sharci fulin, waxaan u sii deyn karnaa macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan

hay'adda asluubta ama sarkaalka sharci fulinta. Siideyntan ayaa lagama maarmaan u ah (1) hay'adda si ay kuu siiso daryeel caafimaad; (2) si loo ilaaliyo caafimaadkaaga iyo bedqabkaaga ama caafimaadka iyo bedqabka dadka kale; ama (3) bedqabka iyo ammaanka hay'adda asluubta.

## Adeegsiyada iyo Shaacinnada iyada oo la haysto Oggolaanshahaaga:

- ***Adeegsiyada iyo shaacinnada iyada oo la haysto oggolaanshahaaga:*** Marka laga reebo sida kor ku xusan, MNGI Digestive Health, P.A., ama mid ka mid ah kuwa gacansaarka la leh ma adeegsan doonnaan ama ma shaacin doonnaan macluumaadka caafimaadkaaga ee ilaalsan adiga oo aan lagaa haysan oggolaansho gaar ah oo qoran. Tusaale ahaan qoraallada daaweynta caafimaadka dhimirka, war-isgaarsiinnada suuq-geynta iyo iibinta PHI dhammaan lama oggolaado adiga oo aan lagaa haysan oggolaansho qoran. Haddii aad ina siiso oggolaansho qoran oo aan adeegsano ama shaacino macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan, waxaan kaga noqon kartaa oggolaanshahaasi, qoraal, waqti kasta. Haddii aad ka noqotid oggolaanshahaaga, uma adeegsan doonno ama uma shaacin doonna macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan sababaha ku xusan oggolaanshahaaga qoran, marka laga reebo ilaa iyo xadka aan horey ugu tiirsanayn oggolaanshahaaga. Ma awoodno in aan dib uga soo noqonno shaacin kasta ee aan horey u sameynay annaga oo adiga fasax kaa haysana, waxaanna nalaga doonayaa in aynu hayno diiwaannadeenna daryeelka aynu ku siinay.

## Xuquuqahaaga Ku Saabsan Macluumaad Caafimaad:

- ***Xuquuqda Xisaabinta Shaacinta:*** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato "xisaabinta shaacinta." Kani waa liiska shaacinta ama sheegidda ee aynu ka sameynay macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan.
    - Si aad u codsato liiskan ama xisaabinta shaacinta, waa in aad codsigaaga qoraal ahaan ugu soo gudbisaa MNGI Digestive Health, P.A. Attn: Privacy Officer, PO Box 14909 Minneapolis, MN 55414. Codsigaagu waa in uu sheegaa muddo-waqti ah oo aanan ka dheerayn lix sano kumana jiri karaan taariikho ka horreeya 14-ka Abriil, 2003. Codsigaaga waa in uu tilmaamaa qaabka aad ku doonayso liiska (tusaale ahaan, warqad, elektaroonik ahaan). Liiska ugu horreeya ee aad codsadto muddo 12-bilood gudahooda ah wuxuu noqon doonaa mid bilaash ah. Liisaska dheeraadka ah, waxaa laga yaabaa in aynu kugu soo dalacno kharashaadyada bixinta liiska. Waxaan kugu soo wargelin doonnaa kharashka ku lugta leh waxaana dooran karnaa in aad la noqoto ama wax-ka-beddesho codsigaaga waqtiga ka hor inta aanan la bixin wax kharash ah.
- ***Xuquuqda loo leeyahay Ogeysiiska Jebinta:*** MNGI Digestive Health, P.A. iyo kuwa gacansaarka la leh waxaa sharci ahaan laga doonayaa in ay oggeysiiyaan shakhsiyaadka ay taabatey haddii ay dhacdo in la jabsado macluumaadka caafimaadka ilaalsan ee aan amaanka ahayn.
- ***Xuquuqda loo leeyahay in la Baaro iyo Koobbi:*** Waxaad xaq u leedahay in aad baarto iyo koobbiga macluumaadka caafimaadka ee loo adeegsan karo in lagu gaaro go'aamada ku saabsan daryeelkaaga. Caadi ahaan, tani waxaa ka mid ah diiwaannada caafimaadka iyo qaansheegga.
    - Haddii aad doonayso in aad baarto oo koobbi ka hesho macluumaadkaaga caafimaad, waa in aad codsigaaga qoraal ahaan ugu soo gudbisaa: MNGI Digestive Health, P.A.; Attn: Privacy Officer, PO Box 14909; Minneapolis, MN 55414.
    - Haddii aad codsato koobbiga ama nuqulka macluumaadka, waxaa laga yaabaa in aynu lacag kugu soo dalacno oo ah sida uu qabo sharciga dowladda ee kharashaadka koobbiga, boostada ama sahayda kale ee la xiriira codsigaaga.
    - Waxaannu diidi karnaa codsigaaga in aad baarto ama koobbi ka hesho xaaladah qaarkood oo aad u xaddidan. Haddii laguu diido in aad hesho macluumaad caafimaad, waxaad codsan kartaa in diidmada dib u eegis lagu sameeyo. Waxaannu u hoggaansami doonnaa natiijada dib-u-eegista.
- ***Xaqa loo leeyahay Codsiga Wax-ka-beddelka:*** Haddii aad dareento in macluumaadka caafimaadka ee aynu kaa heyno in uu yahay mid khaldan ama aan dhammeyn, waxaad inna weyddiin kartaa in aan wax ka beddelno macluumaadka. Waxaad xaq u leedahay in aad codsato wax-ka-beddel inta macluumaadka uu hayo xafiiskeenna.
    - Si aad u codsado wax-ka-beddel, codsigaaga waa in qoraal laga dhigaa loona soo gudbiyaa: MNGI Digestive Health, Attn: Privacy Officer, PO Box 14909; Minneapolis, MN 55414. Waxaa intaa dheer, in aad bixiso sabab taageeraysa codsigaaga.
    - Waxaannu diidi karnaa codsigaaga wax-ka-beddelka haddii uusan qoraal ahayn oo uusanna ku jirin sababta lagu taageerayo codsiga. Waxaa intaa dheer, in aynu diidi karno codsigaaga haddii aad ina weyddiiso in aynu wax ka beddelno macluumaadka:

- Aanan annagga abuurin, haddii qofka ama hay'adda abuurtay macluumaadka aanan la heli karin si ay u sameeyaan wax-ka-beddelka.
- Aanan qaybta ka ahayn macluumaadka caafimaad ee uu hayo ama loogu talagalay xafiiska
- Aanan qayb ka ahayn macluumaad laguu oggolaan doonno in aad baarto ama koobbiso
- Sax ah oo dhammeystiran

- ***Xuquuqda loo leeyahay Codsiga War-isgaarsinnada Sirta ah:*** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato war-isgaarsiinno sir ah. Tusaale ahaan, waxaad weyddiisan kartaa in aan keliya kaagala soo xiriirno shaqada ama iimayl-ka. Waa in aad codsigaaga ka dhigtaa qoraal aad u soo dirayso MNGI Digestive Health, P.A., Attn: Privacy Officer, PO Box 14909 Minneapolis, MN 55414. Kuma weyddiin doonno sababta codsigaaga. Waxaanna aqbali doonnaa dhammaan codsiyada macquulka ah. Codsigaaga waa in uu ku cad yahay sida ama halka aad doonayso in lagaaga la soo xiriiro.
- ***Xaqa loo leeyahay in la Codsado Xannibaad:*** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato xannibaad in lagu soo rogo macluumaadka ilaalsan ee aynu adeegsano ama shaacinno ee ku saabsan adiga ee loogu talagalay daaweynta, lacag-bixinta ama hawlgallada daryeel caafimaad. Tusaale ahaan, waxaad weyddiisan kartaa in aanan adeegsan ama shaacin macluumaadka ku saabsan qalliinka ee lagugu sameeyay. La noogama baahna in aan oggolaanno codsigaaga. Haddii aan oggolaanno, waxaan u hoggaansami doonnaa codsigaaga haddii macluumaadka loo baahan yahay si laguu siiyo daaweyn degdeg ah. Haddii aad ka bixiso dhammaan qaddarka daaweyntaada ama badeecada jeerkaaga, si kastaba ha ahaatee, waxaannu oggolaan doonnaa codsiyada lagu xaddidayo shaacinta qorshayaasha caafimaadka ama caymiyeyaasha ee loogu talagay ujeeddooyinka lacag-bixinta ama hawlgallada daryeelka caafimaad haddii uu sharciga u baahan yahay ama loo adeegsanayo ujeeddooyin daaweyn mooyaane.
  - Si aad u codsato xannibaadda, waa in aad codsigaaga qoraal ahaan ugu soo gudbisaa MNGI Digestive Health, P.A. Attn: Privacy Officer, PO Box 14909 Minneapolis, MN 55414. Codsigaaga, waa in aad noogu sheegtaa (2) macluumaadka aad doonayso in aad xaddido; (2) haddii aad doonayso in aad xaddido isticmaalkeenna, shaacinta ama labadaba; iyo (3) cidda aad doonayso xaddidaadda in lagu dabaqo, tusaale ahaan, shaacinta ama u sheegidda xaaskaaga.
- ***Xaqa loo leeyahay Nuqulka Warqadda ee Ogeysiiskan:*** Waxaad ina weyddiin kartaa in aannu ku siinno nuqulka warqadda ah ee ogeysiiskan waqti kasta. Xitaa haddii aad oggolaatay in aad elektaroonik ahaan u hesho ogeysiiskan, waxaad weli xaq u leedahay in aad hesho nuqulka warqadda ah ee ogeysiiskan.
  - Waxaad ka heli kartaa nuqulka ogeysiiskan mareegtadeenna: www.mngi.com
  - Si aad u hesho nuqulka warqadda ah ee ogeysiiskan, la xiriir MNGI Digestive Health, P.A.:
    - Boostada- Attn: Privacy Officer, PO Box 14909; Minneapolis, MN 55414
    - Telefoonka- 612-871-1145, opt 2

## Su'aalaha iyo Cabashooyinka:

- ***Cabashooyinka:*** Haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga asturnaanta lagu xad-gudbay, waxaad cabasho u soo gudbin kartaa xafiiskeenna, ama Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha. Laguuma ciqaabi doonna soo gudbinta cabashada. Cabashooyinka oo dhan waa in loo soo gudbiyaa qoraal ahaan.

**Si aad Cabasho Ugu Soo Gudbiso:**

***Xafiiskeenna:***
MNGI Digestive Health, P.A. Attn:
Qareenka Bukaanka
Box P.O. 14909
Minneapolis, MN 55414

***Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha:***
US Department of Human Services
Attn.: Office of Civil Rights
200 Independence Ave. SW
Washington, D.C. 20201

- **Su'aalo iyo Macluumaad Dheeraad ah:** Haddii aad qabtid su'aalo ama aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hab-dhaqanadeenna asturnaanta iyo gaar ahaan ogeysiiskan fadlan kala xiriir Maareynta Macluumaadka Caafimaadka (HIM) 612-871-1145, ikhtiyaar 2.

***Isbeddellada Ogeysiiskan:*** *Waxaan xaq u leenahay in aan ogeysiiskan beddelno. Ogeysiiskan ayaa dhaqangelaya 14-ka Abriil, 2003 waxaa uunna dhaqangal ahaanayaa ilaa aynu ka beddelno. Waxaannu xaq u leenahay in aynu dhaqangal ka dhigno ogeysiiska dib loogu noqday ama wax laga beddelay ee dhammaan macluumaadka caafimaadka ee aan kaa hayno iyo sidoo kale macluumaad kasta ee aan helno mustaqbalka. Waxaannu xafiiska ku soo dhejin doonnaa nuqulka ogeysiiska hadda. Ogeysiiskan ayaa adiga lagu siin doonnaa marka ugu horreysa ee adeeg laguu fidiyo wixii markaas ka dambeeyanna si sannadle ah ayaa laguu siin doonna.*

*La Cusboonaysiiyay Maajo 2016*